

MA TAHAY IN LAGAA BAARO Cagaarshoowga B?



Cagaarshoowga B waa fayras ku dhaca beerka wuxuuna keeni karaa kansar.



Dad badan ma oga inay qabaan caabuqa waayo ma dareemaan xanuun, laakiin waxay fayraska u gudbin karaa dadka kale.



Waxaa jira talaal badqab iyo waxtar leh oo looga hortago cagaarshoowga B.



Cagaarshoowga B waxaa laga qaadaa:



Hooyada uurka leh ee ku rida ilmaheeda markuu dhalanaayo



Samaynta galmada



Taabashada dhiiga qof caabuqa qaba



Wadaagista sakiin, buraashka cadayga, ama cidiiyo jarta

Cagaarshoowga B KUMA faafo:



La wadaagista cunto ama maacuunta cuntada



Xabad saarka, shumiska iyo in gacmaha la isqabsado

QOFKEE AYAY TAHAY IN LA BAARO?



Dadka uurka leh



Dadka la nool qof qaba caabuqa Cagaarshoowga B



Dadka ku dhashay dhulka cagaarshoowga B uu ku badan yahay, sida qaarada Afrika, Eeshiya, ama dadka waalidkood ku dhasheen wadamadaas.



Dadka qaba khataraha qaarkood

Si aad u hesho xog dheeraad ah:

www.cdc.gov/hepatitis/hbv/
doh.wa.gov/hepbhub

Hep B Hub

doh.wa.gov/hepbhub



Washington State Department of

Health

DOH 420-408 May 2022 Somali

Si aad u codsato dukumiintigaan oo qaab kale ah, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov.

Waxaa lagasoo xigtay Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)